



**HOWARD
CENTER**

Help is here.

TAN II 1865



**BUUG-YARAAGI
RUKUNKI**

DAABA'OWKI LIYAAD

MAAY-MAAY

Tihraa'a Degdegi eh



Nambarki Guud ee Howard Center **802-488-6000**

Qadki Galowki ii Qaathathowki

May liheli koree Isniinta-Jimaatha, 8:30am illaa 5:00pm

Qof kisti yaa hang weeri koro Howard Center. May biyaanee taageeri, oo kingku ku jawaabaana su'aaloo, oo kii hirni illoo ii atheegoo Howard Center ama bulshaathi.

Sababoo joogtithi eh oo hangweerowki:

- Weydiyowki daaweeyowki ama la talidki
- Dareemowki walwalki quseeyi onog
- Taageeri angki baahangti reerkaa
- Kaalmi ang helowki balwadi



Weerowki Koowaat ee Gobolki **Chittenden** **802-488-7777**

Qadki Dhibaatitha

May liheley 24/7/365

Sababoo joogtithi eh oo hangweerowki:

- Dareemoo had dhaafki eh
- Afkaaroo isdilowki
- Dheegowki ethed ki dhibaw
- Walwalki degdegi eh ee fayooobithi qofki atha jeeli

Galky farshanky may buwaa sawar galnyedky Chittenden Clinic oo suubity Fang Wathareedky Howard Center. Fananky Hormudky eh: Rafad Amjed; Fanaaningty Ku qiibqaathathaw: Thomas Stetson ii Luke Carlson.

Jadwalki Tusmaatha

KI SAABSANG HOWARD CENTER

BAALKI

Ha dhawow	4
Hoolgalkaana	4
Sithi Ang Kaalmeeyaani.	4
Hamilithaana	5
Qiyamoo Muhiimki eh	5
Saa'athoo Hoola	5

ATHEEGOO

Sithi lang Helaw Kaalmi	6
Qaabdhismeedki Ururki	7
Talitha Rukunki	7
Beesi biyowki Atheegoo.	8
Abuurowki Jawi Badbaathi eh	9

HAQUUQOO RUKUNKI II AQBAARTI SHARIGI

Qarsoothigi Aqbaarti	12
Haquuqoo Rukunki ii Reeroo	13
Masuuliyaalki Rukumoo ii Reeroo	16
Heerki Hakoobowki Anshaha	17
Abashithi Rukunki ii Heerka Ra'faanki ii Nithaamki	19
Hafiiski Qaanuunki Hirfidi – Habraagi Dhaqanki ii Abashithi	22
Foomki La taliyowki Rukunki.	24
Tahanoo Walbarashaathi Bulshaathi, Wathajarka Fanki.	25

JEELAATHA FADEEY INII ISKU DIIWAANGELIITI ED BIYOWKI?

Hattii anku diiwaangalsanayni inii otheyti oo kaalmi ang baahangti, tafathal kula dohow atheeg bihiyaagaa ama shaqaalagi hafiiski ha dhawaayowki foomki diiwaangeliyowki. Si haq anki weeldhati otheyyowki Vermont, waa inii

1. haataa muwaading Mareykan eh;
2. daganaataa Vermont oo daganti baledki atha ku odsathoyti inii linki dara liiski hubiyowki; (AMA haataa militeri ama otheyyigi dibidi roogo may anki qalameey sithi quseyti Heerki fatheraalki ee dadki Lebisang ii Muwaadinki dibidi ki Moqon kaas oo meeli angki damboyti ee daganaayi Mareykanki islamadaasbi kuhor intii anki guurni dibidi hayti baledki ama aasimidi Vermont);
3. qaathati, ama horaang ang qaathati, Dhaarti Ed-bihiyaagi; ii
4. eti 18 sani jar ama ku wiingti ama galoyti 18 ama kuhor maalangti doorishithi.

Ki saabsang Howard Center



Haki dhawaw Howard Center! Ki mahatsangti an dooqowki Howard Center hanaanithaa ii/ ama hanaanithi qaraabathaa. Buug-yaraagi may ling naqshatheeyey inii ki ogeysiiti wal quseeyi Howard Center, wathaagni walaagii qiimeeyaani, ii sharahowki haquuqoogaa ii masuuliyaalkaa. May liki heli koree afaf shal duwang, daaba'aw far wing, ii qaab korongti eh. Hattii atha jeelaathi fadi qaab ku duwung ama hattii atha ang baahangti aqbaari kasti oo lasii sharahi, tafathal warsoy hubing shaqaalagi eh ama hang weer leenkaani guud 802-488-6000.

Ana oo matalaw reerki Howard Center, may riijeeyaanee inii atheegithaana waltar ang aragti oo taageerowkaa atha ii/ama reerkaa. May ki dathaalaanee inii biini hanaani luku tahadiri, ihtiraamang, oo waltar leh, ii daaweeyowki ariinyoo, waayeelki, reeroo, ii bulshithaani. Kingi mahad nagaani kooyowki Howard Center oo may rijaayeenee inii kii darni jidkii fiyoobithi.

Daa'animi,

Beth Holden

Beth Holden, MS, LCMHC, LADC
Jiifki Sarkaalki Atheegoo Rukunki

HOOLGALKAANA

May ki kaalmeeyaanee dadki ii bulshaatha inii hormariyang iyoo oo biyaw taageeri ii atheegoo wal langku qobothaw aafimaatki maskanti, istimaalki muqaadiraadki, ii baahiyaalki hormarki.

SITHI ANG KAALMEEYAANI

Howard Center may letaa taariig dheer oo hodon eh sithii atheeg biyi la aamini ee bulshathaani. Iyee oo leh dhahal dareeri walku bathang 150 sani, Howard Center may biyaasee hanaani hormarsang, nahariis leh, tayeesang, taageeri leh, ii daaweyowki hubnoogaas bulshithi ang baahang. May ling aasaasey 1865 sithi hayid ang atheegaasi ariinyoo danyarti eh, Howard Center hatta may biyoytee aafimaatki maskangti, istimaalki muqadiraadki, ii atheegoo hormarki oo intii li noolyi eh.

Shaqaaligaani oo ki koobang 1,600 may ki biyaayaani kaalmi ii taageeri in ku bathang 60 meelood oo afar wadang eh. Wal ku bathang 19,000 rukung ii hubnoo bulshithi yaa kaalmi ning kooyi sanithii la hadhaafi si ang hogaamini nolol aafimaadang oo raahi leh.

HAMILITHAANA

Howard Center may buwaa hogaang qarang oo deersiiyowki taageeriyaalki iski jirang bulshaatha quseeyang ee langki talagali shaqsiyaadki, reeroo, ii bulshooyinki baahang. **Kaalmitha bilaashu.**

QIYAMOO MUHIIMKI EH

- Rukumoo may buwaa muhiimki go'aan deerkeeni.
- May noo gohoni fiyoobithi ii guuli guud ee shaqsiyaalki.
- May enaa wakiili mas'uul ku eh illoo nilii aamini.
- May ki adkeysithaanee hab dhaqimithaana ii weydiyowki faylahaang.

Howard Center may ku gohono aafimaatki ii badbaathitha rukumiyaalkaana, shaqaaligi, ii bulshaathi. Tafathal warsoy atheeg bihiyigaa ama hafiiski ha dhawaayowki wal quseeyi tahadaroo badbaathitha hatta jirang. Tafathal manki roog maddii atha jirangti ama hattii atha lakulumoyti aastaamoo jirootha. Hattii ang baahangti inii roojithi balangtaa, may koo odsathaanee inii sheegti ogeysiis hora sithi suuragalki eh. Balamoo tiloofonki may liheleey maddii la odsatha.

SAA'ATHOO HOOLA

Saa'athoo bee'mushtirki aathige eh ee goobiyaaalki Howard Center shal duwangnying luku bilaaba 8:30am illaa 4:00 ama 5:00pm, Isniing – Jimaa, ii goobo qaas eh ii barnaamijyi la balaariyi ama saa'thoo liyaraayi. Saa'thoo atheegi shal duwangnying waana daba'sangnying sithi quseyti baahiyaalki rukunki. Atheegoo qaarshoo, oo ki jirang taageerithi daginaangshigi ii atheegoo dhibaatitha, may la biyey 24 saa' geekii, 7 gee sitimangkii, 365 gee sannathii.



Nambarki Guud ee Howard Center

802-488-6000

Qadki Galowki ii Qaathathowki

Hangweerowki Koowaat ee Gobolka Chittenden

802-488-7777

Qadki Dhibaatitha

24/7/365

Atheegoo

SITHI LANG HELAW KAALMI

Qofkasti yaa hang weeri koro nambarki guud ee Howard Center, **802-488-6000**, si kaalmi ang ku hela. Maddii hang weerti, may liki warsatheey sababti hang weerowkaa, oo may helaasee aqbaarti quseyti illoo bulshaatha ii sharuuthoo ang qalamowki langki talagali barnaamijyitha shal duwan. Hattii ang baahangti oo go'aansati, may liking balamiyeey qiimeeyowki qaathidki.

Barnaamijki masiibooyinka mobbeelki 24/7/365 ee Howard Center, Weerowki Koowaat ee Gobolki Chittenden, may lang heleey taageeritha talefonki, walqabatki fool-ku-foolki, ii qiimeeyowki masiibooyinka. Hattii tha roogti meel ku dheer Gobolki Chittenden oo atha ang baahangti taageerithi masiibooyinki, may kii hiraanee illoo deegaankaa, maadaami gobol kasti ee ki yaala Vermont leyi atheegashoo masiibooyinki.

Ku dib qiimeeyowki qaathidki ama masiibooyinki, may luku yaabee inii liking gudbiyi hal barnaamij ama barnaamijyi bathang oo Howard Center ama illoo kala ee bulshaatha, sithii langki baahathi. Mararki qaarshoo, gubnithi may si toos eh lingki suubiyey barnaamijki Howard Center iyee oo ang jarna qiimeeyow hora; tusaala hang hattii uni ku helni gudbiyow iskoolki. Hattii jirang liiski sugowki ee langki talagali atheegoo lang baahanyi, may helaasee taageeri atha oo sugaasi. Maddii atheegi Howard Center bilaabatha, may liking hil saaree bihiyigi koowaat kaas oo kii li shaqeyaw si ang go'aansithi baahiyaalkaa ii doorbithiyaalkaa. Si wathajar eh may ang abuuraasee qorshaagi atheeg la gaareeyi ama qorshaagi daawweyowki. Bihiyigaa may ki suubiyi koree gudbini dheeraad eh oo guthoo Howard Center ama koohatee kala ee bulshaathi hattii atheegi ama taageeri kale lang baahathang atha ama hubing reerkaa eh.

Turjumaadi afki oo Onleenki eh yaa lang helee weerowki talefonki, fool-ki-fool, ii atheegoo qadki aafimaatki.

Hattii atheegoo langki baahathi meel ku dheer Howard Center, may sithoo kala hang ku weera kortee 2-1-1 tilefonkaa. Vermont 2-1-1 may buwaa illoo gobolki guud hang oo biyaw aqbaar ii gudbiyow atheegoo shal duwang, oo ka jirang shaqitha,

walbarashaathi, hanaanithi onogi, barnaamijiyithi dawladi, koohatoo taageeritha, gargaarki sharigi, gaathiithki, iskifiyaalki raashiinki bulshaatha, ii illoo kala. Atheegi may li heleey 24/7/365 oo may buwaa weerowki deegaanki oo meelkasti oo Vermont eh. Turjumaadi afki oo Onleenki eh wal biyee.

QAABDHISMEEDKI URURKI

Howard Center may biyaasee atheegi shal duwang:

- Atheegoo galowki ii qaathathowki
- Barnaamijiyithi masiibooyinki
- Atheegoo bukaan dareerki
- Taageeroo ii atheegoo mudithi dheer
- Barnaamijiyithi mangki ii bulshaathi
- Barnaamijiyithi iskoolki
- Daawooyinky jirithy la istimaalaw daawathy mandoriyigy
- Atheegoo yaraayowky walyeelawky

TALITHA RUKUNKI

Ku qiibqaatahkaa qorsheeyowki ii qiimeeyowki atheegoo atha hela may buwa qiib muhiim eh oo falsafasathi hay'adi. May jaraani qaabab bathang oo ki dhiiri geliyaani ku qiibqaathadkaa.

Rukumoo kulushoo, ii hubnoo reerki hattii ki habongti oo rukunkini ogolyi, ku qiibqaathoy hormariyowki qorshaagi (qorshiyaalki) atheegishoo. Bilaabidki atheegoo ku hor, may ang li kulamaasee bihiyaagi qiimeeyowki, ii watha jarshoo may go'aan ku deeraasee atheegoo kii habong. Atheeg bihiyigi koowaat dyaa liking hilsaaree atha. May ki hiringtaa barnaamijki (barnaamijiyithi), qofkung may luku yaabee inii lingki weera lataliyi, shaqaalagy bulshaatha, daaweeyi, maamuligy daryeelky, shaqaalagy taageerithi, taqtar, kalkaaliyi, ama wal limid eh. Atheeg bihiyigi may kiili hiriiryey hanaanithaa. Atha ii atheeg bihiyigaa may suubiyaasaana qorshi hanaani eh oo liki daboolaw baahiyaalki shaqsigaa. May go'aansithaasee walaagii yoolilkaa iyeen, tilaabooyinki ang baahangti inii qaada sithii ang deerti yoolalkung, ii sithii ki ogaathaasi inii diyaar ang eti inii ki meeldeerti atheegoo kala ama ku tabti hay'adi. Atheeg bihiyigaa may kii kaalmeeyaasee gudbiyaalki atheegoo kala ii/ama atheeg bihiyaalki jaalki hattii muhiim eti. Mararki qaarshoo, rukumoo may doorithi koraana inii hormariyaang qorshooyinki qaaski eh waqti hora hattii haaladiyiyoo ku sii darta ama ka

dhiyi dhibaati kala oo halis eh taas oo ki adkeyti inii go'aami deerang. Hang may linka seey dardaarang hora. Hattii atha jeelaathi fadi aqbaar bathang oo quseyti dardaarang hora, tafathal warsooy atheeg bihiyigaa.

Howard Center may leyiini koohati bathang, oo ling kisaw Gudiyaaalki Joogtithi eh, oo linki talagali rukumoo ii/ama reerooshoo si ang siiyang jiwaab nagow ki sabsang atheegoo ii talithi shaqithaana hatta ii dirdaarangki mustaqbalki ee Howard Center. Guddiyaalki Joogtithi eh may buwaa: **Golagi Tallathi Reerki, Shabakithi Talithi Rukunki, Atheegoo Hormariyowki Guddigi Joogtithi eh, ii Guddigi Tallathi ee Atheegoo Istimaalowki Muqaadiraadki.** Li dohow atheeg bihiyigaa ama li hiriir lambarki guud ee Howard Center, **802-488-6000**, walaagii aqbaar dheeraad eh. May dheer, wal ku bathang boqolkiibi 50% oo Gollaha Sara ee Howard Center may buwaa rukumi ama hubnool reershoo.

Koo ku mid eh qaababki ang qiimeyna atheegithaana may buwaa warsithowki sithi rukumoo ang qana'sanyiin ii hattii atheegoo iyoo helaayaang iyoo kaalmeeyeng. May istimaalaanee foomki su'aaloo iyee oo rukumoo helaayaang atheegi ii hiriirki rukumoo kudib maddii dhammaasirti atheegoo. Ku qiibqaathadki nithaamkun may buwaa iqtiyaar oo si wiing yaa kingku mahad nagni.

BEESI BIYOWKI ATHEEGOO

Atheegoo Howard Center may liki biyeey beesitha dhinigi illi beesa shal duwung.

Noo'yatha bathang oo aymiske eh, oo ki jirang Medicaid, wal aqbalee. Hattii atha qobti aymis, tafathal lukoy kaarkaa booqishithaa koowaat, ii aqoonsigi sawirki. Ogaw qaar ku mid eh shirkathoo aymiski may ang baahanyiini aymis wathaag. Hattii atha aymis ang



lahayni, may istimaalaanee baahadi qidmooyinki si lang dajiyi qidmooyinki shaqsigi sithi quseyti haaladi dhaqaalagi. Tafathal ogaw in hattii atha doorati inii atha istimaala aymiskaa, baahada qidmaathi mal atheegsithi koro. Qidmaathaa may lukiing sharaheey ku hor intii ang bilawna inii qaathata atheegoo.

Howard Center may ku gohona li shaqeyowki rukumoo, reeroo, aymiyayaalki aafimaatki, hay'athoo deegaanki ii gobolki, shirkithi qaas eh, ii illi kala oo ang illaaliyaw maalgeliyowki laki taageeraw atheegoo lang baahangyi. Hadidyaalki dhaqaaligi ma hadithaw helowki atheegoo.

Hattii atha qobto su'aala biilki eh, hang weer 802-488-6920.



ABUURROWKI JAWI BADBAATHI EH

Meel walbi oo Howard Center may ki qalabeysangtaa dab damiyaagi ii saanathoo gargaarki koowaat. May jaraana tilmaamigi albaabki haaladi degdegi eh oo ka dhagang meel ang dhaw albaab kasti. Meel kasti may letaa qorshaagi ku bahowki qaaski eh. Hattii atha jeelaatha fadi koobigi qorshaagi haaladi degdegi meela, tafathal warsooy atheeg bihiyigaa. Borotokoolitha dab damiyowki ii badqabki hirowki (oo saas oo kala laki dhajiyaw meel ang dhaw albaab kasti) si joogti eh yaa langki dhagami.

Guud haang, may jaraana angki yarang hal hubing shaqaali eh oo roogo meel kasti kaas oo ang tababarang CPR ii gargaarki koowaat. Shaqaaloo may sithoo kala ang tababarangiini Tahadirawki Aalamigi eh. Hattii haalat ha bati oo shaqsigi ang baahangyi hanaani aafimaat ama Tahadar Aalami eh waa inii la fuliyaa, rukumoo may warsathi koraana hubingti shaqaaligi inii ha fara geliyi. Meela bathang yaa leti qalabki baarowki wadnaathi.

Hiriirkaana noo kula dhaheeyi hang ang atheegaani may ki saleysangyaa ihtiraam guud ii tigeliyaw. In kastoo qaar ku mid eh shariyaalki ii filishooyinki uni tilmangni may luku yaabee inii lahaka rogo heerarki gobolki ama fetheraalki, hadafithaani guud may buwaa inii ang abuurni waayi aragnimi fayle rukumathaane eh.



Hab dhaqin guud oo ihtiraam leh yaa luku filathee rukumoo ii shaqaaloo. Majara hub liki ogolyi dhismaagi hay'adi. Haysathowki ii/ama istimaalowki daroogi kasti oo shari dara eh oo dhismaagi hay'adi si toos eh yaa lang mamnuu'i. Sithi quseyti sharigi gobolki Vermont, istimaalowki kulushoo walyaaligi tubaakithi ee dhismooyinki hay'adi, lamathaba guthoo ii binaanki, si etheg yaa lang mamnuu'i maddii luku reeba meeliyaalki lang qoondeeyi qaar ku mid eh barnaamijyathaana deegaangki. "Walyaaligi tubaakithi" may ki jiraani walyaaligi tubaakithi kulushoo, sikereedki korontithi eh, ii wal kasti oo walyaaligi nokitiinki ii aaladi li ansihyi. (Isti'maalki walyaaligi badelaw nikotiingki oo FDA ansihiyeng oo lingki talagali roojiyowki wal ogolyi.) Hattii atha fathaasi aqbaar dheered eh oo la hiriirti tirikoobki istimaalki tubaakathi, kaalmithi roojiyowki, ama la dowhowti qabiirki roojiyowki, tafathal booqoy www.802quits.org ama hang weer **1-800-784-8669**. Walaagii illoo daaweeyowki isti'maalki muqaadiraadki oo dheeraadki eh, la hiriir atheeg bihiyigaa ama hang weer **802-488-6000**.

Hayiwaanithi atheegi, taageerithi darengki/hayiwaanathi la jara, ii hayiwaanki atheegi ee ki jara tababarki wal haki dhawaayee dhismaagi hayidi ii hooloo hayidi bathanshoo, sithi shaqaali bathang ii jaalki rukungki oo la jirang hayiwaanithi atheegi. May muhiim eh inii li ogaatha in iyee oo hayiwaanithi ii hayiwaanithi etheegoo ee ki jara tababarki wal ku ogolyi meeliyaalki hoyki bulshithi, taageerithi darengki/

hayiwaanithi isla jirang ma haysithang isli iqtiyaarki helowki sharigi. Ku booqooy www.ada.gov walaagii shariyaalki ii qaanuunathi li hiriirang atheegi ii taageeroo darengki/hayawaanoo li dareerang.

Sithi quseyti Heerki Ameerikaanki Naafithi eh (ADA), hayiwaanki atheegi may ling qeehey sithi “ey si gaas eh lang tababari oo shaqi suubiyaw ama ang suubiyaw shaqooying shaqsigi naafithi eh.” Hayiwaanithi atheegi ee ka jara tababarki wal ang ogolaathi koro sithi quseyti sharigi galowki Vermont. Hayiwaanithi atheegoo may ki kooyaayaana noo’yi ii abiri shal duwang oo mang baahang inii si muuqtiti lang aqoonsithi. May buwaa inii ki hoos jirang hakameeyigi galangti oo hiringti markasti illaamaa hirhirowki hayiwaanki ha dha gali qabsigi liki kaalmeeyi hoolo naafanimithi la hiriirti.

Wakti ka wakti, may luku yaabee inii ki aragti kooh eeyiyaal eh dhismoogaana taas oo liki marti qaathaw booqishithi koo ku mid eh barnaamijyaalkaana. Maadaami luku yaaba inii atha ang kasni noo’i eyki ee luku yaba inii ki aragti Howard Center, may faylee inii lili dohowa qabsithaagi ku hor ku qiibqaathidki hayiwaanki. Tafathal faham inii wal bathang oo hayiwaanathung may li jaraani qofshoo oo sababoo li hiriirang naafinimaathi, markung muhiimwu inii ling arqalathayni hayiwaanki usu oo suubiyaw dhawaqyaal, raashiing siiyaw, ama iski dayaw inii ribaayadsithi.

Haquuqoo Rukunki ii Aqbaarti Sharigi

QARSOOTHIGI AQBAARTI

Shariyithi fatheraalki ii gobolki yaa illaaliyee aqbaartaa qarsoothigi eh. Ihitiraamowki qarsoothigi muhiim yaa ning eti. May ang istimaalaanee oo angki fasahaanee aqbaarti aafimaatkaa daaweeyow, beesi biyow, ii howlgaloo hanaanithi aafimaatki, sithi liki tilmaami *Ogeysiiskaana Hab dhaqamoo Asturnaangti*. Tang may ki jartee istimaalki ii fasahowki aqbaarti aafimaatki athi ki quseyti si madaas daaweeyowki ii atheegoo atha ku heli hayida may luku yaabee inii liki ansihiyi, oo lang diri, oo may beesithina biyey hisbi sadiyaad sithi shirkidi aymiski. Aqbaarti istimaalowki aalkulithi ii daroogithi may ki ilaalsangtaa 42 CFR Qiibti 2 oo may luku yaabee inii langki fasani iyee oo ang jarni ogilaangshiga oo qoron illaamaa hattii kala liki sheegi heerarki.

May likingkili taliyey in sithi quseyti daruufoo sharigi qaarshoo, sithi aqbaarti highti, ee quseyti atha ii reerkaa yaa la fasaha koro iyee oo ang jarni ogolaanshigaa:

- May nii waajib eh sharigi Vermont si la hangsheegi kiisis hadguthub rung eh ama luku shakiyi, la day'i, ama ku faa'itheysiga ka lugleh ariinyoo ii dadki liithithi oo wing.
- May lininku baahangyaa inii qaadni tilaaba ki habong hattii ki jarti halas dhow naftaa, dadki kala, amy bulshithi guud oo hattii dhiity haalad aafimaat degdeg eh amy dad wiinigy guud.
- May haq ang lenaa inii shaa'ini hanjabaathoo li rumeysithi koro ee rabshiyaalki ama walyeelithi lahangku horjeethi dhibiniyaalki li aqoonsithi koro, ama bulshithi guud, oo ki jirang dadki ama goobyaaalki dhismeega.
- Marmarki qaarshoo, may ang baahithi kornee inii ang hogaansangti amirki odsigi mahkamata si lang marqaati fura ama diiwaaniyaal ang biini.
- May sheegaanee aqbaarti aafimaatki ee athi ki quseyti maddii angki baahangti inii saas liki suubiyang sharigi fatheraalki, gobolki, ama deegaanki.



HAQUUQOO RUKUNKI II REEROO

Yoolki Howard Center may buwaa inii liki biyi atheegi ii daaweeyow jawigi angki hadithang ee laku hela koro qaab jawaab ii ki haboonang ang leh sifooyinkaa qaaski eh, baahiyaalki, rabitaanithi, ii awoothiyaalki.

- May hag ang letaa in lakiikili dhagama si sharaf eh oo ihtiraam leh mar kasti maddii atha helaasi atheegiyaal. May haq ang letaa daaweeyow ii hanaani ki filing oo bani aadannimi eh
- May hag ang letaa atheegi ii taageeri iyee oo ang la hiriirni jinsiyidi, diing, sinji, asalki qowmiyidi, sanitha, dooqa galmaatha, naafanimithi, ama heerki HIV.
- May hag ang letaa inii wal la haku ogeysiiyi heerarki hayida ee saameeyaw mudithi daaweeyowkaa ama qibridi atheegi. Warsooy atheeg bihiyigaa aqbaar bathang ee li hiriirti heerarki hayidi qaaski eh.
- May haq ang letaa inii lahaki ogeysiiyi aqoonsiyithi ii shahaadooyinki atheeg biyigaa. Taqtarki ilmi nafsigi shatiyaysang oo liisgareysang yaa ki siiyee atha aqoonsishoo ii shahaadooyinshoo waqti ang ku dambeyni hiriirshoo sadiyaad oo iyoo hakii li hiriirang. Aqoonsiyithi ii shahaadooyinki ee hubnoo kala ee shaqaaligi atheegi tooski eh yaa atha liki siiyey maddii atha warsiti.
- May haq ang letaa inii atha heli aqbaar ki saabsang shuruuthoo ang qalimowki ii mudnaanoo maalgeliyowki, atheegiyaalki la heli koro, barnaamijiyithi ii taqtaryaalki, tilmaamigi hab dhaqimowki, hab dhaqamoo maamulki, ii nithaamyithi abashithi ii ra'faanki.

- May haq ang letaa inii dooraty heerkaa ku qiiibqaathadky suubiyowky daaweyow qaas luku weely amy qorshaagy taageerithy oo ki jara dad kala ii hayithy/nithaamyi sithii atha fada, ii reed ang fiirisky qorshiyaal ii diiwaani noo'aas eh.
- May haq ang letaa ogolaanshigy hog ogaalky eh ii ku qiiibqaathadky go'aamoo suubiyaw hathafky daaweeyowkaa /atheegoo, oo ku jarang muujiyowky tihraadyithaa la hiriirang iqtiaarky maamulaagy hanaanithy, daaweeyigy, amy atheeg bihiyi kala.
- May haq ang letaa inii ky dooraty howard center, amy meelkala, si kastaba haatoo, aymiyaagy aafimaatkaa yaa luku yaaba inii biyi bas eh atheegoo biyang bihiyaalky ku diiwaang gashang qorshaagy aafimaatkaa.
- Intii laka jara qaathidky, amy waqta kasty intii laka jara haalidy atheegoo, may li bilaaba kortee watha haajood atheeg bihiyaagaa si angky muujity doorbidkaa la hiriiri atheeg deersiiyowky, fasahowky aqbaarty, atheeg watha dhiyaw, ay ki jara koohty atheeg deersiiyowkaa, ii ku lug lahaanshigy mashruu'yithy ilmi baaowky, hattii quseyty.
- May haq ang letaa inii heli aqbaar waqtiyeysang, oo quseyti oo liki futhuthaayaw go'aan deerkaa.
- May haq ang lettaa asturnaang aqbaartaa: Qarsoothigaa may ki illaalsangtaa sharigi gobolki ii fatheraalki maddii luku reebi haalathoo qaaski eh ee li ogolyi ama sharigi ang baahang.
- May haq ang letaa inii diidi daawithy amy nithaamky daaweeyow qaas eh.
- May haq ang letaa helaw waqtiyeysang oo, ii inii la hela koobigi diiwaanithi aafimaat oo unu koo hayni ii/ama atha king hayni, oo li jirang ku dheefowki qaar. Odsigaa oo diiwaanithi waa inii li oofiyeey ee oo ang jarni daayow ma'quul ing hayni. May litaa haquuqi dheeraad eh oo li hiriiri aqbaarti aafimaatkaa ee liki tilmaami *Ogeysiiski Hab dhaqamoo Asturnaangti.*
- May haq ang letaa illaaliyaalki sharigi kulushoo ii nithaamki adaalidi oo heerki sithi bukaang dareer ii bukaan jiif, lamithibi iqtiaar ii iqtiaar ang hayni, sithi liki qeehi sithi quseysti sharigi Vermont.
- May haq ang letaa inii hela ama liki siiyi gudbiyaw shirkithoo sharigi ee langki tala gali matilaad ki habong.
- May haq ang letaa inii hela ama liki siiyi gudbiyaw is kaalmeeyowki ii atheegoo taageeithi ang doothowki.
- May haq ang letaa inii weeldhita had guthub kasti oo liki eetheeyi oo haquuqoogaa li baari.

- Onogi ama qaanggaarki oo leh qaski darengki darang sithi laki sheegi ACT 264 kaas oo ang baahang atheegoo wal ku bathang hal hayid yaa haq ang leh hormariyowki Qorshaagi Atheegoo Li hiriiriyi oo lang maraw nithaamshoo qorsheeyowki koohti daawithiyoo. Hattii atha sithii waalid ama masuul ang ki qana'sanayni hiriiriyowki atheegoo, angku ku ra'faang qaathithi korto ACT 264 dhinigi Hayidi Atheegoo Aadinaaga.

Intaas may dheera haquuqoogung, ku qiibqaathiyaalki barnaamijiyithi qaar may lahaathi koraana haquuqi dheeraad eh ama haquuqoo liki sheegi qaab ku duwung. Rukumoo may li ogeysiiyey haquuqishoo sani kasti ama ingti bathang sithi langku baahanyi Gobolki ama hay'athoo kala ee maamulaw ama shariyeed.

Huquuqoogung mang baahang wal aafimaat eh, aafimaatki maskanti, ama hiraafathoo atheegi si ang maamuli daaweeyowki ki soo horjeethi go'aanki hiraafadlaagi hattii daawithi dhaafti heerki hiraafidi ama atheegi lang araga inii dhibaata ang sheenaw fayooobithi shaqsaga ama dhaafsiing illoo dhaqaaligi ee ururki.

Ma jara wal kumid eh haquuqoo koro oo ku illaaliyaw barnaamijki atheegoo yareeyowki ii burburiyowki ee qofki oo biyowki daaween ki habong ama atheegyaal suuragal ang hayni sithi sababti didmaathi qofki ini ogolaathi ama ii li shaqeeyi oo si maquul eh lang siiyi ii hanaanithi la siiyi ii atheegoo taageerithi.





MASUULIYAALKI RUKUMOO II REEROO

Atheegoo may waltar leyiini bas eh maddii jirang iskaashi ang dhahooyi rukunki ii atheeg bihiyaagi. Kulushoo hisbiyaalki may ang baahanyiini inii suubiyaang balangqaad buuhi oo liki deeraw yoolalki daaweeyowki ii atheegi. May warsathaanee rukumoo kulushoo inii gohonti hang ha dareerang:

- Ku qibqaathidki joogtithe eh ee daaweyowki ii atheegoo
- Ku qib qaathidki joogtithi eh ee booqishithi balangsang ama balamoo
- Beesi biyowki waqtigi atheegi maddii qidmi toos eh la ogolaatha
- Haliyowki qilaafaatki shal duwanaanti oo qaab ma'quul eh
- Ma jirang hanjibaatha korki ii af haag eh, hab dhaqangki digaal eh
- Mal ku ogol hub dhismaagi hayidi
- Sawar qaathowki ama duubowki shaqaala kasti oo hayidi eh may ang baahangtaa ogolaanshishoo oo af hang eh; shaqaaligi mal anku baahang inii ka jirang sawiri ama duubis kasti
- Mal ku ogol sikereed dhuugow ii istimaalowki walyaaligi tubaakithi eh dhismiyaalki hayidi
- Mal ku ogol daroogithi shari daraathe eh ama alkulu dhismiyaalki hayidi

Hattii filishooyinki koro lang raani, hayidi may letaa haquuqti laki roojiyaw ama hanibaathi liki saaraw atheegoo. Haquuq kasti ama mudnaan kasti oo li hadithi ama li hakiyi may li haka nagi koree go'aanki hayidi, iyee oo liki saleeyaw daruufoo qaaski eh ii sababti hadithowki ama roojiyowki.

HEERKI HAKOOWKI ANSHAHA

Howard Center may ha saartey Heer Anshi eh oo luku filaathaw shaqaaligi inii ang hogaansama. Hakobowki filishooyinki anshihi may liki tilmaameey hoostung.

- Shiqaaligi Howard Center ki ihtiraamee oo may kor ang qaathey haquuqoo rukumoo oo aaya ku tashadki oo may ki kaalmeeyaasee rukumoo inii aqoongsithang oo adeeyang yoolalshoo.
- Shaqaaligi Howard Center iyoo oo og ma suubiyaayang dhaqang dadki dhibaw ama hoos ang dhikaw dadki oo iyoo isla falgalaan shaqithiyoo, sithi quseyti sannitha qofki, sinjigi, jinsigi, qowmiyi, asalki dhalashaathi, diingti, dooqa galmaathi, naafinimi, luuqad, ama heerka dhaqaaligi.
- Shaqaaligi Howard Center maki isti' maalaayang af sharaf dilow eh hiriir kasti oo qorong ama afki eh.
- Shaqaaligy Howard Center waa inii angky qiibgalny taabatky korky rukumoo oo daawa hang muhiim angki hayny, ii nahowky li ogeysiyyu.
- Shaqaaligi Howard Center may helaayaani ogilaanshi li ogeysiyyi oo ki habong oo daaweyowki ama nithaamyithi li hiriiri, maddii luku reebi tusaali hang oo awoodi ogilaanshigi su'aal ku teegangti.
- Shaqaaligi Howard Center may sharahaayaani atheegoo li biyi ii natiiji kasti oo atheegiyaal noo'aas eh oo luuqithoo fahami koro helaagi atheegithaas.
- Shaqaaligi Howard Center may qaathaayaani tilaabooying liki dajiyaw haduuthi ki habong maddii suuragal ang hayni ama ma'quul ang hayni inii luku fogaathi hiriirki bulshaathi ama hriirki kala ee hirfadleegi ang hayni ee rukumoo, ardayti, kormeeriyaalki, ama ku qiibgaliyaalki ilmi baaristi. Mar kasti oo suuragal eh, shaqaalaha Howard Center may ku fogaathaayani inii ang li dhaqamang rukumoo meeli hiriir hora sababi koro dhibaati ama hiriirki galmaathi jari.
- Shaqaaligi Howard Center may suubiyaayaana dithaali ma'quul eh oo liki qorsheeyaw hanaanithi hattii dhiithi inii atheegoo ilmi nafsigi arqilithayang haqiiqoo sithi jirithi, dhimishaathi, ama balangsigi helowki.

- Shaqaaligi Howard Center ma idleeyaw bukaanithi ama rukumoo. Shaqaalaha Howard Center may si ki habong an roojiyaayaani hiriirki hirfidlaagi maddii si maquul eh ang edaati inii bukaanki ama rukunki inii markali angki baahanayni atheegi ama unku faa' thaani atheegoo.
- Shaqaaligi Howard Center muku qiibgalayang, saamahowki, ama futhuthiski takoorowki adaalidi ang hayni ee quseyti sanithi, sinjigi, jinsiyidi, qoomiyidi, asalki dhalashaathi, diingti, dooqi galmaathi, naafinimaathi, luuqidi, ama heerki dhaqaaligi.
- Shaqaaligy Howard Center may kulu dohowaayani rukumoo sithy angky horeyti oo suuragalky eh, noo'a atheegoo li filathaw, qidmaathy, shahaadooyinky shaqaaligy, ii qarsoothigy.
- Shaqaaligi Howard Center may linku baahanyaa inii ha sheegang hadguthubki luku shakiyi ee arinyoo ii waayeelki eh oo nugul ii hanjibaathagi walyeeligi shaqsigi, dadki kala, ama bulshithi guud.
- Sithy angky horeyty oo suuragalky ki eh hiriirky hirfadlaagy, shaqaaligy Howard Center ii rukungky, amy helaagy atheegoo kala ee ki habong, may deeraayany heliis qeehaw abaabulky biilky. Shaqaaligy Howard Center ii rukumoo/masuulky yaa dhamaasiree foomky heliisky beesi biyowky oo ku hathalaw hatheynty kasty ee atheegoo oo luku yaabi inii ang dhiyang sabab li hiriiry daboolowky dhaqaaligy/aymisky.
- Shaqaaligi Howard Center may suubiyaayaani qiimeeyow, atheegoo baarowki, ama walqabadyithi liki sheegi bas eh ma'naagi guud ee hiriirka hirfidi la qeehi.
- Shaqaloo Howard Center may ku reebathanayany inii aqbalang, wal dhaafsang qirishiyaalky aathigy eh, hadiyoooyinki, beesi biyowky shaqaaligy, alaaby, atheegy, amy magdhowky kala ee beesithy ang hayny ee rukumoo.

Noo' dhammaasiring oo Heerki Anshaha Howard Center, oo ki jirang dulmarki koowaad, saas oo kala sithi mowduu'yithi kala, may luku heli koree websaydkaani ee **www.howardcenter.org**.

ABASHITHI RUKUNKI II HEERKA RA'FAANKI II NITHAAMKI

Sithi rukunki Howard Center, may haq ang letaa inii harayti abashi quseyti atheegoo athi heli. May si hoogang kingki dhiirigeliyaanee inii odsati koobi dhammaasiring oo *Heerkeena Abashithi ii Ra'faanki ii Nithaamyithi*, maadaami iyee wathati aqbaar li sharahi oo ling naqshitheeyi inii ki kaalmeyti intii laki jara nithaamoogun. La dohow atheeg bihiyigaa ama shaqaalagi hafiiski ha dhawaayowki si ang odsati aqbaar bathang. Walaagii ki haboonaangti eh, may ha koobney heerki dhoorki baal ee higang.

QEEHITAANITHI

Go'aansigi Faa'ithithi Hung: may luku wathee koo kasti oo kang ku mid eh:

- Diidmaathi ama ogolaanshigi hadithang ee atheegi la odsathi, oo ka jirang go'aamathi ki saleysang noo'a ama heerki atheegi, shuruuthoo muhiimki aafimaatki, ki haboonaangti, meeli, ama waltarki atheegi daboolang
- Yareeyowki, hakiyowki, ama roojiyowki atheegi horang lin ansihiiyi
- Diidmaathi, guud hang ama qiib hang, oo beesi biyowki atheegi
- Hattii ki guuldaraysati inii atheegiyaal ki siithi qaab waqtiyaysang, sithi sheegeen Hayidi Atheegoo Insaanki
- Hattii ki guuldaraysati inii anki dhaganti jadwalki waqtagi lang gooyi ee li hiriiri halki aathiga eh ee abashooyinki ii ra'faanithi
- Diidmithi odsagi ka faa'ideystaaga ee laki helaw atheegoo binaanku ku eh shabakaathi
- Diidmaathi odsigi ka faa'itheysadki ee ki qilaafaw mas'uulnimithi maaliyithed, oo ki jirang qarash withaagi, withaagi beesi biyowki, qidmaathi aymiski, beesithi la jara koro, aymis withaagi, ii masuuliyithi kala ee ku faa'itheystaagi

Ra'faanki (quseeyi shaqsiyaadki leh Medicaid): Odsigi afki ama odsigi qorong ee rasmigi eh oo ku kooyi rukunki oo ki dareerti hayidi si red angki fiiriyaaan go'aanshoo ee gomaamiyowki faa'ithithi hung. Ra'faanki **degdegi eh** may buwaa ra'faanki haaladi degdegi eh taas oo si dhab eh halas ang geliyaasi

no loli rukunki; aafimaatki; ama awoodi liki helaw, liki joogteeyaw, ama la reebathaw shaqithi angki bathang.

Wakiilki Lang ithimi: Shaqsi, midshoo oo maga'aabi rukunki ama ansihiyi sithi quseyti sharigi gobolki, si angki dhaqanti matalowki rukunki helaw go'aamiyowki ama lima'aamilaw heer kasti oo abashi ama nithaamki ra'faanki. Illaamaa hattii kala liki sheegi, inii wakiilki ansihiyi leyi haquuqoo kulushoo ii masuuliyathoo ma'miilki iyoo matalang.

Dhugunsigi Adaaladi eh: Kang may buwaa nithaamki garsoorki meelaas oo rukunki ii hayidi lang hilsaari oo koo kasti hang bandhikaw dhini kasti sarkaalki dhugunsigi hirfidi. Dhugunsigi adaaladi eh may li heley bas eh kudib maddii rukunki ki daali nithaamki guthoo ee Howard Center oo li hiriirti go'aamiyowki faa'ithithi hung.

Abashithi: Doo qorong ama afki eh oo ki qanasanang laangti rukunki ee quseeyi arang kasti oo unku hayni go'aamiyowki faa'ithithi hung.

Reed ang fiiriyowki Abashithi: Reed ang fiiriyowki guthoo ee nithaamki go'aan deerki abashathi ee qolo sadiyad oo eeh laang eh oo guthoo Howard Center.

HEERKI

Abashithi ama ra'faanki si ki habong yaa lang fiiriyee oo may li tihgeliyey qaab waqtiyaysang. Rukumoo, ii/ama masuuloo, hattii quseyti, wal ha ogeysiiyee heerka abashithi ii ra'faanki hayidi ii nithaamyithi maddii qaathadki ii sani kasti markaas kudib, ama ang yarang hana qashi shal duwang hattii heliisyi qaas eh li tilmaami. Heerki ii nithaamki may saas oo kala liki dhajeey goobiyaalki atheegi ii websaydki hayidi. Intaas may dheera, shaqaalagi kulushoo wal ang tababareey abashathi rukunki ii heerki ra'faangki ii nithaamyithi maddii la kireysathaw ii amy lamy sana kasty madaas kudib. Shaqsi kasti oo bilaabaw ama raadraahooyo abashi ama ra'faang hor yaa ku haathaayang noo' kasti oo aargoosad eh amy takoorow. Walaagii su'aali eh ee ki saabsang heerarki ama nithaamyithi la hiriirang waa inii liki eediyaa Agaasimaagi Maareeyowki Aqbaarti ii Ang hogaansanaangti Howard Center. May jaraani afar wakiili hayidi oo dheeraad eh si lang hubiyi ang hogaansanaangti heerkung. Agaasimaagi Maareeyowki Aqbaarti ii Ang hogaansanaangti may ang atheegey

sithi hiriiriyaagi abashathi ii ra'faanki ee guud haang Howard Center oo may ku masuul eyaa hubiyowki ku baarangdagow waqtiyeysang ii haliyowki abashithi ii ra'faanithi kulushoo. Wathihathalki kulushoo ee ka heerang nithaamki go'aanki ee abashathi ii ra'faanki may linku haayey qarsoothi ku kooyi bulshithi guud ama hisbigi sadiyaad, ilaamaa odsathi rukunki.

Hattii atha aamingsangti inii haquuqoo asturnaangtaa liki had guthubi, may haki hareeyi kortee abashi hayidi ama Secretary of the Vermont Agency of Human Services (Hoghayaagi Hayidi Atheegoo ii Insaanki Vermont). Si langki hareeyi abashi hayidi, hala hiriir Qadki Ang hogaansadki oo talefong haang lambarki hoos ki qorong. Tafathal ogaw inii abashooyinki asturnaangti lang qobotho sithi lang ku baahangyin sharigi fatheraalki oo mal ki sheegni dhinigi nithaamki abashathi hayidi.

Rukumoo Park Street Program ii Barnaamijki Mangki Ku meeldeerki may qobaani haquuqoo abashaathi oo dheeraad eh oo ki qorong heerki hayidi ee Heerki Suuliyowki Kufsigi Jeelki (PREA). Foomki abashathi PREA may luku heley websaydki www.howardcenter.org.

Jadwalki waqtagi ii sharuuthoo laangti qaaski ang eh may luku yaabee inii ku wanaathi may ki hirangtaa barnaamijki oo abashithi ama ra'faanki ku dhiithi. Wakiilki abashathi ii ra'faanki lang maga'aabi yaa masuul ku haathee reed ang fiiriyowki ii ang hogaansadki sharuuthoo laangti shal duwang, maddii langki tilmaangni heerkung.

Waqta kasti, qofki shaqaaligi eh ama rukunki yaa hali hiriiri koro Qadki Ang hogaansadki atha oo hang weeraasi 802-488-7195 si ang kireebti fariin edki qarsoothige eh. Haang may nagatha koraani qarsoothi. Badalshee, rukumoo may i-meel hang diri koraanyodsiyaal kasty oo abashooyinky ama ra'faanithy clientG&A@howardcenter.org. hang weerowky kulushoo ii i-meelithy wal qirithee oo reed yaa lang fiiriyee.

Koobiyaalki heerki buuha ee hayidi ii nithaamyithi may lang heley rukun kasti maddii la odsatha.



HAFIISKI QAANUUNKI HIRFIDI – HABRAAGI DHAQANKI II ABASHITHI

Hoghayaagi Gobolki Vermont ee Hafiiski Qaanuunki Hirfadlaagi yaa biyey shatigi Vermont, shahaadooyinki, ii diiwaangeliyowki oo wal ku bathang 55,000 oo hirfadleyaal ii gana'siyaal eh.

Hirfid ama shaqi kasti may liki maamuleey shariyi qeehaw anshaha hirfidlaagi. Hattii tang quseyti atheeg bihiyigaa shahaadeysang/lang qoondeeyi ee Howard Center, usu ama iyee yaa ki siiyee koobigi Foomshoo Shaaciyowki ii shariyithi quseeyaang. May ku heli kortee koobiyaalki shariyaalki qaaski eh websaydki Hoghayaagi Gobolki Vermont ee Hafiiski Qaanuunki Hirfadlaagi <https://sos.vermont.gov/opr/>.

Rukumoo fathaw inii hareeyaang abashi may ki suubiyi koraani saas websaydki Hafiiski Qaanuunki Hirfadlaagi athoo booqithaasi <https://sos.vermont.gov/opr/complaints-conduct-discipline/>. Walaagii aqbaar eh may li hiriiri kortee Hafiiski Qaanuunki Hirfadlaagi athoo qoraasi ama hang weeraasi:

Office of Professional Regulation
89 Main Street, 3rd Floor
Montpelier, VT 05620-3402
802-828-1505

Maddii li heli abashathi, reed ang fiiriyowki maamulki yaa go'aansithee hattii arimoo la sheegi ki daboolangi shariga anshahi hirfadi. Hattii saas eti, guddi lang hilsaari oo baaraw, aruuriyaw aqbaar, oo kili taliyaw tilaabi ama hiriirki hayidi maamulaasi ee ki habong.

Baaritaanithi abashathi kulushoo may buwaa qarsoothi. Hattii baaritaanki lihaki hagabagabeeyi go'aan tilaabathi edbiyowki ee ka eedang shatigi hirfadlaagi ii awoodi langki dhagamaw, magaagi haysithaagi shatigi yaa li shaa'iyee madaas.

Tilaabithi edbiyowki ee lang maraw Hafiiski Qaanuunki Hirfadlaagi may ang dhaheytee anaang illaa ku laabidki shatigi, laaking maki lugleh magdhabowki dhaqaaligi, oo wathati ku dhaafowki qaarshoo. Gunithi dhaqaaligi may liki dabagala koree looyara qaas eh, mahkimathoo sheegishooyinki yaryar, ama Qiibti Illaalatha Rukunki ee Hafiiski Qareenki Guud.

FOOMKI LA TALIYOWKI RUKUNKI

(koobigi oo raadraa' bas eh)



HOWARD
CENTER
Help is here.

La taliyowki Rukunki

- * Go'aankiigaa oo liki istimaalaw atheegathaana may buwaa iqtiyaari.
- * Atheegoo Howard Center may buwaa dithaal iskaashi oo ang dhaheeyi ma'miilki ii bihiyaagi. Iyee oo ki klansongni inii atheegoothaani faa'ithi king weeldhathaasi, ma jarang wal damaani qaad eh oo quseeyi natiijooyingki daaweyowki, dabigalowki, ama taageeritha
- * Barnaamijiyithi qaarshoo may istimaala koraana daawiyaalki ama farsamaathi intii laki jara daaweyowki sithi nasashithi, yoogithi, ama sawirki lahagi. Bihiyaagaa yaa tang koola dohoweey si eed ang sharahang hattii eta inii hela wal ku mid eh atheegoothung.

Haqiijiyowki Shaa'ingti Rukunki


May li ing jiheeyey Howard Center oo ka jarang:

1. Hoolgalki ii Qiyamyeeethi
2. Saa'athoo Hooloo, oo ki jarang Atheegoo Masiibithi
3. Sithi lang Helaw Atheegoo ii Qaabki Hay'adi
4. Talitha Ma'miilki
5. Beesi biyowki Atheegoo
6. Abuurowki Deegaang Badbaathi eh
7. Qarsoothigi Aqbaarti
8. Haquuqoo Rukumeethi ii Reeroo
9. Masuuliyaaalki Rukumoo ii Reeroo
10. Heerki Hakoobowki Anshaha
11. Heerki ii Sharuuthoo Abashaathi Rukunki, Alool humaathi, ii Ra'faanki
12. Hafsiiski Qaanuunki Hirfidi – Habraagi Dhaqanki ii Abashithi
13. Aqoonsiyaalki ii shihaadooyinki atheeg bihiyigeey
14. Dariigi ku bahowki meele imergensigi eh oo goobti dab damiyowki
15. Ogysiiski Hab dhaqimoo Asturnangti

May li iijabeeyey aqbaarti kora oo fabamsani ii ogolaathi walaagii ka jara.



2015, Howard Center may bilawtee inii biithi **tahaniyaal walbarashi bilaash eh oo bulshaathi ang furang** iyee oo ku qiib eh hoolgalkaani ii ang atheegowki bulshaathi si angki kaalmeyni walbarowki, ang ogeysiini, ang yarayni eeboo, ii kordhiyowki wa'yigeliyowki quseeyi mowthuu'yithi shal duwang ee aafimaatki quseeyi.



HOWARD CENTER may ha bandhikaasee THE MARNA AND STEPHEN WISE COMMUNITY EDUCATION SERIES BILAASH OO BULSHITHINI ANG FURUNGTI

Aqoonsingi inii iyee oo lang maraw faham eed ang dhamaasiring oo aqabathoo aafimaatki, may ki kaalmeeyo kornee qaabeeyowki bulshi nahariis bathang oo hool kar eh. Bandhigyaalki fiidhiyow yaa liki duubin oo may luku heley www.howardcenter.org.

Tafathal hanoo kala qiibgal koo kasti oo dha'thooyinki walbarashaathi bulshaathi eh. Walaagii aqbaar dheeraad eh, booqoy howardcenter.org.

Howard Center Arts Collective may buwaa kooch fanaaning bulshithi eh oo heerar kasti oo hirfatheed eh haanaas oo li noolaayi waayi aragnimaathi jiroothi maskanti ii/ama abaqabathoo istimaalowki muqaadiraadki, iyoo oo atheegsathaw qibridi qaaski eh, ii reeroo ama withaayaalki, ama shaqithiyoo. May si wathajar eh ang shaqeeyaanee si ang hubiini inii jirang fursithi fanaaniingtaana eh si angki hirimaan, ang abuurang, oo hang bandhikaang farshahanshoo. Qiimeeyaani awooda walk u badalowky ee nithaamky hal abuurky heer shaqsy, bulshy, ii nithaam, oo qirsangni inii xoogani maddii qof kasty od leyi.



Galky Buug-yaraagy, ku fiiri deymiyaalky baalky 2.

Hattii athi weydiyowti bulshi hormarsang si ang taageerti oo ang kob'iithi hal abuurkaa, i-meel haningki dir.artscollective@howardcenter.org.

HELP IS HERE.



We respect **WOMEN, MEN** and **NON-BINARY PEOPLE** •
 We value **BLACK LIVES** • We stand with our **LGBTQIA+**
COMMUNITY MEMBERS • We celebrate **CHILDREN** • We
 stand with **IMMIGRANTS, REFUGEES, INDIGENOUS PEOPLES,**
 and **PEOPLE OF ALL FAITHS and ETHNICITIES** • We support
INDIVIDUALS and **FAMILIES** challenged by mental health,
 substance use, and developmental disabilities.

*We stand with our **COMMUNITY.***

HATE HAS NO BUSINESS HERE.
All Are Welcome Here.

الجميع مرحب به هنا • Tắt cả đều được chào đón ở đây
 Tout le monde est le bienvenu ici • အားလုံးကို ခြေထောက် ခြံ့ဖွဲ့ပါသည်
 Dadka kulushoo ha dhawaatheen • Ovdje su svi dobrodošli

歡迎各位 • Dhammaan waa la soo dhaweynayaa
 Wote wanakubaliwa hara • Todos son bienvenidos aquí
 Сви су добродошли овде • མི་ཚོར་ཆ་ལེགས་པར་དགའ་བསྟོན།
 सबै जनालाई यहाँ स्वागत छ।



**HOWARD
 CENTER**
 Help is here.

TAN II 1865

Reed lang firiyi janaayi 2024